A.HAKIM





FADLIGA

LAYLATUL QADRIGA

2025

1446H

Prepared by :
ABDIHAKIM
MOHAMED
ABDI

Fadliga Laylatul Qadriga waa mid aad u weyn, waxaana ka marag kacaya Qur’aanka iyo Xadiiska Nabiga ﷺ. Alle wuxuu Qur’aanka ku yiri:



إِنَّآ أَنزَلۡنَٰهُ فِي لَيۡلَةِ ٱلۡقَدۡرِ (1) وَمَآ أَدۡرَىٰكَ مَا لَيۡلَةُ ٱلۡقَدۡرِ (2) لَيۡلَةُ ٱلۡقَدۡرِ خَيۡرٞ مِّنۡ أَلۡفِ شَهۡرٖ (3) تَنَزَّلُ ٱلۡمَلَٰٓئِكَةُ وَٱلرُّوحُ فِيهَا بِإِذۡنِ رَبِّهِم مِّن كُلِّ أَمۡرٖ (4) سَلَٰمٌ هِيَ حَتَّىٰ مَطۡلَعِ ٱلۡفَجۡرِ (5)

(Suurat Al-Qadr: 1-5)

Macnaha: “ Annagaa soo dajinnay Quraanka Habeenka Laylatul Qadarka ah (sharafta leh) (1). Ma taqaana LaylatulQadarka.(2). Waa Habeen ka khayr badan Kun Bilood (oo kale)(3). Waxaana soo daga Malaa'igta (kale) iyo Malaku Jibriil habecnkaas idanka Eebe dartiis iyo amarkiisa(4). Waana Habeen nabadgalyo inta uu waagu ka baryo (5)”.

Fadliga Laylatul Qadriga:

1. Waa Habeen ka Kheyr badan 1000 bilood (83 sano iyo 4 bilood). Camalka wanaagsan ee lagu sameeyo habeenkaas wuxuu u dhigmaa camal la sameeyo muddo dheer oo ka badan 1000 bilood. Tusaale hadaad 1 jus oo qur’aan ah aad aqriso waxay ka dhigan tahay adiga oo aqriyey 1000 bilood kabadan habeen walba hal jus oo qur’aan ah , waxaa la mid ah salaada iyo sadaqada iyo dhamaan camalka wanaagsan.

2. Malaa’igtu wa ay soo degaayan, gaar ahaan waxaa habeenkas soo degaayo malakul Jibriil

(عليه السلام) waxay ku soo degayaan habeenkaas amarka Rabbigood.

3. Habeenkan waa nabad iyo barako ilaa ay waagu ka baryayo.

4. Dambi dhaaf ayaa lagu helaa:

Nabigu ﷺ wuxuu yiri:

(من قام ليلة القدر إيمانا واحتسابا غفر له ما تقدم من ذنبه)

“Qofkii Laylatul Qadriga soo istaaga (salaadda iyo cibaadada u istaaga) isagoo rumaysan ajarna ka rajeynaya, dhammaan dambiisii hore waa loo dhaafaa.”

(Bukhaari iyo Muslim)

Waxyaabaha la sameeyo habeenka Laylatul Qadriga:

1. Salaatul Layl (Qiyaamul Layl):

Habeenkaas waa habeen la tukado salaado badan, gaar ahaan Taraawiixda iyo Tahajudka. Isku day in aad u istaagto salaad dheer, adigoo ku dheereynaya Qur’aan akhris, rukuuc iyo sujuud.

2. Qur’aan akhris:

Qur’aanka waa la akhriyaa habeenkaas si aad u hesho ajar weyn. Qofka akhriya Qur’aanka wuxuu helayaa xasanaad kasta oo xaraf ah. Nabiga ﷺ wuxuu yiri:

عن ابن مسعود قال : قال رسول الله صلى الله عليه وسلم { : من قرأ حرفا من كتاب الله فله حسنة والحسنة بعشر أمثالها ، لا أقول الم حرف ، ولكن ألف حرف ، ولام حرف ، وميم حرف } . رواه الترمذي .

“Qofkii akhriya hal xaraf oo Qur’aan ah, wuxuu helayaa xasanaad, xasanaadkuna wuxuu le’egyahay toban laab.”

(Tirmidi)

3. Duco:

Nabigu ﷺ wuxuu kula dardaarmay Caisha (RC) inay ducadana sameyso habeenka Laylatul Qadriga. Wuxuu baray ducada:

في سنن الترمذي في حديث عائشة – رضي الله عنها – قالت: قلت يا رسول الله: أرأيت إن علمت أي ليلة ليلة القدر ما أقول فيها؟ قال: قولي اللهم إنك عفو كريم تحب العفو فاعف عني.

“Allaahumma innaka ‘afuwwun tuhibbul ‘afwa fa’fu ‘anni.”

Macnaha: “Ilaahow, adigu waxaad tahay Dhaafe, waxaad jeceshahay cafiska, ee ii dhaaf.”

4. Sadaqo:

Habeenkan sadaqadu waxay u dhigantaa sadaqo la bixiyay muddo ka dheer oo dhan 83 sano! Sadaqadu waa sabab ka mid ah sababaha la isku helo naxariista Alle.

5. Istighfaar iyo Allah xus:

Waa habeen lagu badinayo “Astaghfirullaah” iyo xuska Alle sida “Subhaanallaah, Alhamdulillaah, Allaahu Akbar.”

6. Isla xisaabin naftaada:

Habeenkan waa fursad lagu cabirayo noloshaada — inaad is waydiiso sidee ayaan Alle u adeegaa? Maxaan saxaa? Maxaan hagaajiyaa? Waxaad niyada gashataa inaad noloshaada cusub u billaabayso dariiq toosan.

Goorma ayay tahay Laylatul Qadrigu?

Nabigu ﷺ wuxuu inoo tilmaamay in Laylatul Qadriga la raadiyo 10-ka habeen ee ugu dambeeya ee Ramadaan, gaar ahaan habeenada witriga ama kisiga ah (lambarada kalle ah: 21, 23, 25, 27, 29).

Astaamaha Laylatul Qadriga

waa calaamado lagu garto habeenkaas weyn. Waxaa jira calaamado la arki karo habeenka gudahiisa iyo kuwo la dareemi karo subaxa ka dambeeya. Aan kala qaadno:

1. Astaamaha Habeenka Gudihiisa

• Nabadda iyo Deganaanta:

Habeenkan wuxuu leeyahay salaam (nabad), sida Qur’aanka ku cad:

“سَلَٰمٌ هِيَ حَتَّىٰ مَطۡلَعِ ٱلۡفَجۡرِ (5).” (Al-Qadr: 5)

Dadka cibaadada ku jira way dareemaan daganaansho nafsi ah iyo farxad gudaha ah.

• Cimilada oo dhexdhexaad ah:

Nabiga ﷺwuxuu tilmaamay in Laylatul Qadriga aysan ahayn habeen aad u kulul ama aad u qabow ah, balse waa habeen dhexdhexaad ah, cimiladeeda la dareemi karo inay naxariis leedahay.

• Dareenka Qalbiga:

Dad badan oo cibaadada ku jira waxay dareemaan daganaan, farxad iyo rajo xad-dhaaf ah oo qalbiga ku degta.

2. Astaamaha Subaxa Ka Dambeeya

• Qorraxda oo soo baxda iyada oo aan lahayn iftiin daran:

Nabiga ﷺwuxuu yiri:

سألت أبي بن كعب رضي الله عنه فقلت : إن أخاك ابن مسعود يقول : من يقم الحول يصب ليلة القدر ، فقال رحمه الله : أراد أن لا يتكل الناس أما إنه قد علم أنها في رمضان ، وأنها في العشر الأواخر وأنها ليلة سبع وعشرين ، ثم حلف لا يستثني أنها ليلة سبع وعشرين فقلت : بأي شيء تقول ذلك يا أبا المنذر ؟ قال : بالعلامة أو بالآية التي أخبرنا رسول الله صلى الله عليه وسلم أنها تطلع يومئذٍ لا شعاع لها).

“Qorraxda maalintaas way soo baxdaa iyada oo daciif ah (aan lahayn iftiinkeedii caadiga ahaa), waxayna u egtahay sida saxan aan lahayn fallaaraha daran.”

(Muslim)

Dadka waayo aragga ah ee xuska iyo cibaadada badan sameeya way dareemaan qorraxdaas qafiifka ah subaxa dambe.

• Hawo nadiif ah, degan:

Subaxda dambe cimilada way degan tahay, hawadu waa nadiif, waxaana jira dareen gaar ah oo dagan.

Gunaanad

• Astaamaha Laylatul Qadriga waa:

• Habeen dagan oo leh iftiin gaar ah.

• Cimilada oo dhexdhexaad ah.

• Qalbiga oo degan, farxad dareemaya.

• Subaxa dambe oo qorraxdu si tartiib ah u soo baxdo, aan lahayn iftiin daran.

Intaa ka sokow, muhiim ma aha in aad sugto calaamadahan si aad u cibaadayso — xitaa haddii aadan arkin astaamaha, haddii aad cibaadada dadaal badan geliso, Alle ajarka wuu ku siinayaa..

Jadwalka Habeenka Laylatul Qadriga

1. Habeenka oo bilaabma (Maqrib)

• Salaadda Maqrib: Tukasho khushuuc leh.

• Afurka: Bixi sadaqo yar intaadan afurin (xitaa hal xabo timir ama biyo) — sadaqo kasta waxay ka badan tahay 1000 bilood ajarkeeda.

• **Duco**: "اللهم بارك لنا فيما رزقتنا وقنا عذاب النار." (***Ilaahow noo barakee wixii aad na siisay oo naga badbaadi cadaabta naarta.)***

2.Tukasho Salaadda Cishaha iyo Taraawiix

3. Qur'aan Akhris (Salaadda Kadib)

• U qoondee 30-60 daqiiqo oo Qur'aan ah.

• Haddii aadan Qur'aan badan aqoon, akhri waxaad awoodo oo ku celceli, xitaa hal suurah oo keliya.

4. Salaatul Layl (Qiyaamul Layl)

• Tukado Tahajjud (2, 4, 6, 8, 10 rakcadood sidaad awooddo).

• Sujuudka ha dheereeyo. Nabiga ﷺwuxuu yiri: "Ugu dhawaanshaha addoonka ee Rabbigiisa waa marka uu sujuudayo, marka duceeya inta badan." (Muslim)

5. Ducooyin Muhiim ah

Ducadii Nabiga ﷺuu baray Caisha (RC):اللهم إنك عفو كريم تحب العفو فاعف عني .

“Allaahumma innaka ‘afuwwun tuhibbul ‘afwa fa’fu ‘anni.”

(Ilaahow, adigu waxaad tahay Dhaafe, waxaad jeceshahay cafiska, ee ii dhaaf.)

Iyo Ducooyin kale oo badan aad sameyn karto:

6. Sadaqo

• Sadaqo kasta habeenkan waa la laban-laabaa ajarkeeda. Xitaa hadii ay tahay shay yar, Alle wuxuu eegayaa qalbigaaga daacadda ah.

Talo: Haddii aad awooddo, samee niyyad inaad sadaqadaada qayb ka mid ah si joogto ah u bixiso 10-ka dambe habeen kasta.

7. Istighfaar (Dambi dhaaf) iyo Adkaar

Sida " استغفرالله واتوب إليه "

• Badso: “*Astaghfirullah wa atuubu ilayh.”*

(Ilaahow dambi dhaaf baan kaa baryayaa, waxaan kuu noqday adiga.)

• Sidoo kale, ha ilaawin adkaarta caadiga ah sida:

“Subhaanallaah, Alhamdulillaah, Allaahu Akbar, Laa ilaaha illallaah.”

Gunaanad:

Habeenka Laylatul Qadriga waa habeen naxariis, dambi dhaaf, ajar iyo barako. Si aad u heliso ajarkeeda:

1. Tukado salaado badan oo khushuuc leh.

2. Akhri Qur’aan intaad awoodo.

3. Badi ducooyin, gaar ahaan ducada اللهم إنك عفو كريم تحب العفو فاعف عني

“Allaahumma innaka ‘afuwwun tuhibbul ‘afwa fa’fu ‘anni.”

4. Bixi sadaqo xitaa haday yartahay..

5. Samee istighfaar badan, si uu qalbigaaga u daahirsanaado.

Hadii aad sidaan u raacdo, rajada weyn waa inaad helayso ajir ka badan 1000 bilood.

DHAMAAD



W/Q: ABDIHAKIM MOHAMED ABDI